

Billowga Bisha Soonfur

Sida la og yahay bisha Ramadaan waxa ay sharci ahaan ku sugnaataa laba siyaabood:

1. in la arko bisha habeenka ay soddonka shacbaan tahay.
2. haddii aan la arag habeenkaa waxaa la dhammeystiraa maalinka soddonaad. sidaas ayayna bishu ku billaabataa.

bisha shawaalna waa sidaa oo kale.

waxa ay ku billaabataa:

1. in la arko bisha soonfur habeenka soddonku soo gelaayo, oo subaxeeda ayaa la ciidaa.
2. haddii aan la aragna maalinka soddonaad ayaa la soomaa, maalinta xigtana waa ciid.

waxa uu yiri Rasuulku (ammaan iyo nabadgelyo dushiisa Allaha yeelee):

((صوموا لرؤيته وأفطروا لرؤيته؛ فإن غمَّ عليكم فأكملوا العدة ثلاثين))

ku sooma aragtida bilashada bisha soonqaad, kuna afura aragtida bilashada bisha soonfur. haddii bisha la arki waayana dhammeystira soddonka bisha.

waxaa dhici karta in lagu soomo dhammeystir shacbaan la dhammeystiray, maalinkaa la dhammeystirayna waxaa dhici karta in bishaasi sagaal iyo labaatan ku dhammaanaysay, oo maalin soon ah aan la soomin, saa lama arag e.

haddaba waxa waddamada qaar loo yiri ha la eego bisha habeenka sagaal iyo labaatanka Ramadaan soo geleyso waa sidaa, oo haddii la arki lahaa waxaa caddaan lahayd in seddeed iyo labataan la soomay

maalin baana la soo qalleyn lahaa, illeen bisha islaamku sagaal iyo labataan kama yaraato e, Rasuulku (ammaan iyo nabadgelyo dushiisa Allaha yeelee) waxa uu yiri: bishu sidaa iyo sidaa ayay noqotaa, labadiisa gacmood ayuu isku dhuftay saddex jeer, oo markaa waa tiro

soddon, haddana waxa uu yiri: bishu sidaa iyo sidaa ayay noqotaa, wuxuuna isku dhuftay labadiisa gacmood saddex jeer, marki saddexaad ayuu far laabay. taas oo macnaheedu yahay: sagaal iyo labataan.

Xadiithkaa Muslim ayaa wariyay

waqtigi Cali ibn abii daalib ayaa ay dhacday in la arkay bishi iyada oo siddeed iyo labataan maalmood la soomay, marki horena aragti luguma soomin, wuxuuna yiri: soo qalleeya maalin. waxaa weriyay ibn abii sheyba (Lambarkiisuna waa 9705) iyo qeyrkii.

Manhajonline